



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 8 ^{aad}	Kulanka: 9 ^{aad}
Taariikhda: 14/10/2026	Goobta fadhiga: Xarunt Aqalka Sare
Saacadda uu furmay: 11:33 AM	Saacadda uu xirmay: 12:13 PM
Shir guddoonka fadhiga: Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi	Guntanka Kulanka: 28 Senator
Martida Kulanka: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimillada Mudane Cabdirisaaq Axmed Cali.	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka. 2. Ansixinta Ajendaha. 3. Akhrinta 2aad ee Hindise Sharciyeedka Hay'adda Saadaasha Hawada Iyo Cimillada JFS.

Furitaanka Kulanka:

Senator Xasan Xuseen Xaaji ayaa akhriyey Aayadaha Qur’aanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 27 Senator

Ka aamustay: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa u yeeray Guddiga Kheyraadka Qaranka, Kaabayaasha dhaqaalaha iyo Gaadiidka Senator Saynab Ismaciil Maxamed si ay Golaha uga hor akhriso warbixinta Akhrinta 2aad ee Hindise Sharciyeedka Hay’adda Saadaasha Hawada Iyo Cimillada JFS. Warbixinta kaddib, 4 Senator ayaa dood iyo su’aalo ka dhibtay Hindise Sharciyeedka. Intaas kaddib, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimillada Mudane Cabdirisaaq Axmed Cali., ayaa ka jawaabay dhammaan su’aalihii ay Xubnaha Golaha Aqalka Sare ka weydiiyeen Hindise Sharciyeedka Hay’adda Saadaasha Hawada Iyo Cimillada JFS.

Go’aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.
2. Guddoomiyaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa faray Guddiga Kheyraadka Qaranka, Kaabayaasha dhaqaalaha iyo Gaadiidka inay soo diyaariyaan qodobada laga doodday, iyaga oo la kaashanaya sharciyaqaanada Golaha Aqalka Sare, si loo marsiiyo akhrinta saddexaad.

Ugu dambayntii, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa kulanka soo xiray saacadu markay ahayd **12:13 PM**.

=DHAMMAAD=